



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, iyo Tiếng Việt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Agoosto 3, 2022

Ku socota: Dhammaan hawl wadaagayaasha ODDS (Fadlan la wadaaga dadka iyo qoysaska ay dhici karto in ay u baahan yihiin adeegyada iyo taageerooyinka ODDS.)

Ujeedada: Ilaha Oregon Caafimaad Badan oo ka socda ODDS

Gobolka ayaa barnaamijka Oregon Caafimaad Badan bilaabay luulyo 1. Barnaamijkani wuxuu xaqiijin doonaa in dad badan oo ku nool Oregon ay heli karaan faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo adeegyada iyo taageerada muddada fog ee ODDS **iyada oo aan la eegayn xaaladooda muhaajirnimo.**

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa ka mas'uul ah ka caawinta in dadku helaan adeegyada iyo taageerada I/DD uu barnaamijka Oregon Caafimaad Badan bixiyo. Wixii macluumaad dheeraad ah, akhri [farriintii agaasimaha ODDS ee ka socotay Juun 10](#).

Fadlan isticmaal ilahani si ay kaaga caawiyaan dhiirigelinta Oregon Caafimaad Badan iyo faa'iidooyinka barnaamijka ku socda kuwa u baahan.

- [Bogga internet-ka ODDS ee Oregon Caafimaad Badan](#)
- Warqadaha macluumaadka wata ee ODDS ee Oregon Caafimaad Badan
 - [English](#)
 - [Español / Spanish](#)
 - [Русский / Russian](#)
 - [Soomaali / Somali](#)
 - [Українська / Ukrainian](#)
 - [Tiếng Việt / Vietnamese](#)

- [简体中文 / Simplified Chinese](#)
- Luqadaha kale ayaa la helayaa marka la codsado
- [Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Barnaamijka Oregon Caafimaad Badan \(Isbaanish\)](#)
- [Waxyaabaha barnaamijka Oregon Caafimaad Badan uu boosta ku soo diro iyo warqado macluumaad wata](#) (oo la heli karo iyaga oo ku qoran luqaddo badan).
- Faa'iidooyinka barnaamijka Oregon Caafimaad Badan saameyn kuma yeelano xukunka Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge', laakiin waxaa jira waxyaabo la iska reebayo oo loogu talagalay adeegyada daryeelka muddada fog ee lagu bixiyo xarun dadka lagu xanaaneeyo ama isbitaalka gobolka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri Ogow Xaqiiqooyinka ku saabsan Gargaarada Dowladdeed "[Know the Facts about Public Charge.](#)"

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida Oregon Caafimaad Badan u saameynayso adeegyadaada ODDS, email u dir ODDS.Questions@dhsosha.state.or.us.

Waad mahadsan tahay,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.